Maxay gaarista mirirka walaac u tahay ee Barnaamijyada Early Learning (Waxbarashada Hore)? Mirirka waa nir culus. Markii lacuno ama gudaha loo neefsado, waxyeelo ayay ku tahay caafimaadka aadanaha. Sida waafaqsan World Health Organization (WHO, hay'ada Caafimaaadka Aduunka), ma jiraan heerar lagaranayo ee gaarista mirirka ee badbaado ah. Ilmaha iyo carruurta yar si gaar ayay ugu nugulyihiin. Xittaa heerar walboo aad u hooseeyo ee gaarista mirirka, carruurta waxay la kulmi karaan saameynada neerfaha iyo hormarka oo ay ku jiraan heerarka IQ hooseeyo, lumitaanka maqalka, baaxada dareenka oo yaraaday, curyaannimada waxbarashada, dareen celin la'aanta, waxqabadka fasalka liito, ama saameynada kale ee waxyeelada leh ee jirka iyo dabeecada.

Waa maxay Jaheynta Duqa magaalada ee Mirirka? Duqa magaalada Jay Inslee's Maajo 2016 Jaheynta (16-06) waxay ka jawaabeysaa walaacyada korayo ee ku saabsan mirirka lagu arkay biyo cabitaanka ee dugsiyada iyo guryaha gobolka oo dhan. Sikastaba, duqa magaalada sidoo kale wuu aqoonsaday in biayah aysan aheyn isha koowaad ee gaarista mirirka ee carruurta. Intaa waxaa dheer weydiinta tallooyinka lagu yareynayo gaarista mirirka ee biyaha cabitaanka, wuxuu weydiiyay Department of Health (DOH, Waaxda Caafimaadka Gobolka) ee Washington inay ku taliyaan qaababka lagu yareynayo gaarista mirirka iyo halisaha kale ee deegaanka halka carruurta ay ku noolyihiin, wax ku bartaan, iyo ku ciyaaraan**.** Wixii warbixin dheeraad ah ee Jaheynta, booqo http://www.doh.wa.gov/Portals/1/Documents/Pubs/300-018.pdf

Maxay Jaheyntaan uga baahantahay Department of Early Learning (DEL, Waaxda Barashada Hore) inay sameyso? Waxay u baahantahay DEL inay la shaqeyso DOH iyo Xafiiska Maamulida Dhaqaalaha gobolka si loo go'aansado baahida xeerarka ee u baahan bixiyayaasha daryeelka carruurta inay qiimeeyaan barnaamijyadooda ee gaarista mirirka. DOH ayaa ku taliyay in DEL hormariso sharciyo cusub ee lagu yareynayo gaarista carruurta ee mirirka. DEL ayaa aasaasto sharciyada u baahan in bixiyayaasha ay tijaabiyaan illaha qaadista mirirka (WAC (Washington Administrative Code, Xeerka Maamulka Washington) 170-300-0235, WAC 170-300-0400, iyo WAC 170-300-0410). Sharciyadaan waxay bilowdeen Maajo 27, 2017. Bixiyayaasha waa inay isticmaalaan sheybaarada ay xaqiijiyeen Department of Ecology (Waaxda Cilmiga deegaanka) ee Washington oo baaritaanka ah (WAC 170-300-0235(2)).

Sharuudaha Baaritaanka Biyaha

Taas oo barnaamijyada waxbarashada hore ay tahay inay ka baarto mirirka iyo naxaaska? Dhammaan daryeelka daryeelka carruurta shatiyeysan iyo bixiyayaasha waxbarashada hore waa inay lahaadaan qasabadaha biyaha ee ay u isticmaalaan cabitaanka, karinta, ama cunto diyaarinta ama caanaha gasaca ilmaha laga baaray mirirka naxaaska. Kaliya sheybaarada Cilmiga deegaanka ee la xaqiijiyay ayaa sameyn kara baaritaanka (WAC 170- 300-0235(2)). Intaa waxaa dheer, sharciyada waxay u baahanyihiin baaritaankaan sida sharuuda hore ee shatiyeynta ee dhammaan daryeelka carruurta cusub iyo bixiyayaasha waxbarashada hore.

Saqabadahee ayay bixiyayaasha u baahanyihiin inay baaraan? Goorma? Intee jeer? Waa inay tijaabiyaan dhammaan qasabadaha loo isticmaalo in lagu helo biyaha cabitaanka, karinta, ama u diyaarinta cunto ama caanaha gacaca ilmaha. Bixiyayaasha shatiyeysan waa inay dhameystiraan Nofeembarta 27, 2017. DEL waxay u baahantahay codsadaha shatiyeynta inuu dhameystiro baaritaanka ka hor inta aan la shatiyeynin. Markaas kadib, bixiyayaasha waa inay dib uga baaraan qasabadahooda biyaha mirirka iyo naxaaska ugu yaraanhaljeer lixdii sannabo*. **Haddii natiijooyinka baaritaanka ay tahay ama ka sareyso tallaabada heerka EPA (Environmental Protection Act, Hay'ada Illaalada Deeganka) ee mirirka ama naxaaska, bixiyayaasha waa inay qaataan tallaabo degdega oo ogeysiiyaan DEL*** (WAC 170-300-0235(2))**.**

Waa maxay heerka tallaabada EPA ee mirirka iyo naxaaska? Ma jiraan sharciga faderaalka ee mirirka iyo naxaaska ee xarumaha daryeelka carruurta. Si kastaba, EPA ayaa hormariyay jaheynta muuno sameynta mirirka ee xarumaha daryeelka carruurta, iyo dajiyaan **heerka tallaabada lagu taliyay mirirka ee 20 qeybaha bilyankiiba (0.020 mg/L)**. **Heerka tallaabada ee naxaaska ee xarumaha daryeelka carruurta waa 1,300 ppb (1.3 mg/L),** taas la dhiganto heerka tallaabada lagu taliyay EPA ee nidaamka biyaha bulshada (WAC 170-300-0235(2)).

Warbixinta jaheyn guud. Kala tasho Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib loo eegay Washington) ee Washington Administrative Code (WAC) ee sharciyada quseeyo iyo xeerarka.

Sidee ayay bixiyayaasha daryeelka caafimaadka u sameeyaan muunooyinka? DEL ayaa hormariso sharaaxada jaheynta muuno sameynta lagu caawinayo iyaga inay u diyaargaroobaan muunada, qaad muunooyinka, faham nastiijooyinka iyo tallaabooyinka ah inay sameeyaan haddii heerarka mirirka ama naxaaska dhaafaan heerka tallaabada ee xaruntooda.

Miyay jiraan liiska sheybaarada biyaha cabitaanka la xaqiijiyay? Haa. Cilmiga deegaanka ayaa joogteeyo liiska sheybaarada ee loo xaqiijiyay biyaha cabitaanka ee http://www.ecy.wa.gov/programs/eap/labs/documents/DWLabs_WAByCounty.pdf.

Halkee ayuu bixiyayaasha ku joogteeyaan natiijooyinka baaritaanka biyaha? Inkastoo bixiyayaasha aysan u baahneyn inay soo dhigaan natiijooyinkooda baaritaanka biyaha, waa inay joogteeyaan koobiga natiijooyinka baaritaanka ee dhismooyinka shatiyeysan.

Maxaa ah inay bixiyayaasha u sameeyaan natiijooyinka baaritaanka inay buuxiyaan ama dhaafaan heerka tallaabada EPA? Isla markaasba jooji u adeegida biyaha oo ku daar il kale oo biyo ah (sida biyaha dhaleysan) oo cabitaanka, karinta, iyo diyaarinta cuntada ama caanaha gasaca ilmaha. Islamarkiiba ogeysii shatiyeeyahooda DEL ama xafiiska goobta DEL wax ku saabsan natiijooyinka oo kala hadal iyaga qaababka lagu ilaalinayo carruurta xarunta joogta. DEL iyo DOH ayaa la shaqeynayo bixiye walba ee tallaabooyinka dabagalka. Biyaha qasabadahaan weli waa loo isticmaali karaa isticmaalada qoyska (maacuun dhaqida, dharka, guri illaalinta imw). Tallaabooyinka loo baahanyahay kadib markii la dhaafo heerka tallaabada mirirka ama naxaaska waxay ku jiraa WAC 170-300-0235(2)(a) illaa (e).

Ceelashada Biyaha Cabitaanka Gaarka

Waa maxay sharuudaha ceelka gaarka? Intaa waxaa dheer mirirka ama naxaaska, bixiyayaasha waxbarashada hore ee ka helaa biyo ceel gaar ah waa inay ka baaraan biyahooda bakteeriyaha coliform iyo cusbada (WAC 170-300-0235(3)). Ceelasha gaarka ah waa inay sidoo kale buuxiyaan heerarka ugu badan ee dhismaha iyo joogteynta ceelasha ee WAC 170-160 http://leg.wa.gov/CodeReviser/WACArchive/Documents/2013/WAC-173-160-CHAPTER.pdf

Intee jeer ayay bixiyayaasha baartaa biyaha ceelka gaarka? Bixiyayaasha shatiyeysan waa inay qaadaan muunooyinka hore ee bakteeriyaha coliform, cusbada, iyo mirirka iyo naxaaska ee ceelasha gaarka ee Nofeembar 27, 2017. Midaas kadib, waa inay ak muuna qaadaan bakteeriyaha coliform iyo cusbada ee ugu yaraan sannad walba iyo mirirka iyo naxaaska lix sanno ee walba. Waaxdeena Kaliya ee Cilmiga Deegaanka ee sheybaarka la xaqiijiyay ayaa sameyn karo baaritaanka. Cilmiga deegaanka ayaa joogteeyo liiska sheybaarada biyaha cabitaanka la aqoonsaday http://www.ecy.wa.gov/programs/eap/labs/documents/DWLabs_WAByCounty.pdf

Waa maxay baaritaanka lagu qanacsanyahay ee bakteeriyaha coliform ama cusbada? Baaritaanka **bakteeriyaha coliform** ee “lagu qanacsanyahay” wuxuu muujinayaa xaadir la’aanta bakteeriyaha coliform (ama bakteeriyaha coliform aan laheyn). Baaritaanka **cusbada** ee lagu qanacsanyahay waa inay ka yaraataa 10 qeybaha bilyankiiba (ppm). Sheybaarada inta badan waxay soo wargeliyaan heerarka cusbada ee miligaraam ahaan liitarkiiba (mg/L). Fiiro gaar ah 1 mg/L waxay la mid tahay 1 ppm. Haddii natiijooyinka cusbada ay ka yartahay 10 ppm laakin ka weyntahay 5 ppm, biyaha waa in dib loogu baaraa gudaha lix bilood.

Maxaa ah in bixiyaayaasha sameeyaan haddii natiijooyinka bakteeriyaha coliform ama cusbada aan lagu qancin? Haddii biyaha ceelka aan laga helin bakteeriyaha coliform iyo/ama ka weyn 10 ppm oo cusbada, bixiyayaasha waa inay isla markiiba joojiyaan u isticmaalida biyaha cabitaan, karinta, ama ku diyaarinta cuntada ama caanaha gasaca ilmaha oo ogeysii maamulka caafimaadka deegaanka iyo DEL oo natiijooyinka ah. DEL ayaa la shaqeyneyso maamulka caafimaadka deegaanka iyo DOH si loo go’aansado tallaabooyinka

Warbixinta jaheyn guud. Kala tasho Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib loo eegay Washington)
ee Washington Administrative Code (WAC) ee sharciyada quseeyo iyo xeerarka.

Bixiyayaasha waa inay qaataan oo ay kala taliyaan marka ay isticmaali karaan biyaha. Tallaabada loo baahanyahay kadib markii la dhaafo heerka bakteeriyaha bakteeriyaha coliform ama cusbada waa WAC 170-300-0235(3)(b) illaa (d), iyo 0235(4).

Illaha Dheeraadka ah

Xiriirka warbixinta Xafiiska Goobta Deegaanka Department of Early Learning waa
https://www.del.wa.gov/about-us/contact-us

Department of Health ayaa bixiso illaha mirirka ee
http://www.doh.wa.gov/YouandYourFamily/InfantsandChildren/ProtectKidsfromToxicChemicals/Preven tLeadPoisoning.

EPA's 3T's for Reducing Lead in Drinking Water in Child Care Facilities (3T's oo Yareynta Mirirka ee Biyaha Cabitaanka ku jiro Xarumaha Daryeelka Carruurta) waa
https://www.epa.gov/dwreginfo/3ts-reducing-lead-drinking-water-schools-and-child-care-facilities

Department of Health "Private Well Water: Coliform Bacteria and Nitrate Information for Private Well Users (Biyaha Ceelka Gaarka: Bakteeriyaha Bakteeriyaha bakteeriyaha coliform iyo Warbixinta Cusbada ee Isticmaalayaasha Ceelka Gaarka ah)" waa
http://www.doh.wa.gov/portals/1/documents/pubs/333-171.pdf

Department of Early Learning
https://del.wa.gov/

Warbixinta jaheyn guud. Kala tasho Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib loo eegay Washington)
ee Washington Administrative Code (WAC) ee sharciyada quseeyo iyo xeerarka.